


Adkee biyo kululeeyahaaga si loo yareeyo khasaare marka ay socoto masiibo ama aafu.

## Adkeynta Biyo Kululeeyahaaga

Ka dib masiibo waxa laga yaabaa in biyo la cabo ay kuugu dhow yihiin biyaha ku jira biyo kululeeyahaaga — waa haddii uu wali sare joogo oo aanu dhicin. Waxa aad ishan biyo ee qiimaha leh badbaadin karta adiga oo ku adkeeya biyo kululeeyahaaga tiirarka derbiyada (wall studs).

Marka hore, fiiri inuu ku xidhan yahay suunka tuubiistaha ama qasabadlaha (plumber's tape) Khubaradu waxay wax ka beddeleen habka loo xidho biyo kululeeyayaasha ka dib dhulgariirada 1989 Loma Prieta iyo 1994 Northridge. Waktigaas ka hor, hal gobol oo ah suunka tuubiistaha ayaa caadi ahaan la isticmaali jiray. Sababta oo ah taangiyo badan oo goostay suumankaas, waxay khubaradu hadda ku taliyaan:

1. In laga xidho xagga sare iyo xagga hoose, halka laga xidhi lahaa kaliya xagga sare ama kaliya dhexda, taangiga.
2. Istimaal suun bir/macdan ah oo qaro weyn halka aad ka isticmaali lahayd suunka tuubiistaha ama qasabadlaha.
3. Dhammaan tuubooyinka ah maar iyo macdan ku beddel tuubooyinka gaasta dabiiciga ah iyo xidhiidhiyayaasha layn biyo (water line connectors) ee jilicsan.




Kani waa SUUNKA TUUBIISTAHA— ma laha xoog ku filan inuu kululeeyayaasha biyaha ka joojiyo inay dhacaan.

Marka labaad, taangiyada ku xidh suuman bir ama macdan ah oo qaro weyn, taasoo ah xagga sare iyo xagga hoose


- Xidhmooyinka loogu talagalay xidhista ama adkeynta ee dukaannada laga heli karo ayaa arrintan ka dhigaya wax fudud. Waxa kuwaas laga heli karaa dukaano badan oo ah kuwa qalabka dhismaha waxana laga helaa goobta lagu bandhigo biyo kululeeyayaasha.

Xidhmooyinkaasi waxa ku dhammeystiran alaabta loo baahan yahay sida suuman, iskuruuyada “lag”, lingaxyo ama waysaro (washers), kala-fogeeyayaal (spacers) iyo boolasha adkeynta (tension bolts).

- Waxa kale oo aad dooran kartaa inaad adigu isku rakibtid alaabooyinka xidhista adiga oo isticmaalaya suuman bir ama macdan ah oo qaro weyn iyo iskuruuyo ah “lag” oo ah 3 inji.
- Si taangiga looga ilaaliyo inuu dib u dhaco, waa in firaqada ama inta banaan ee u dhexeysa taangiga iyo derbiga ay aad u yar tahay. Haddii uu jiro wax ka badan 1 ama 2 inji, gobol loox ah ku dheji derbiga adiga oo isticmaalaya iskuruuyada “lag” oo dhaadheer.



- Suunka macdanta ah ee qarada weyn ku wareeji 1-1/2 jeer wareegga taangiga. Suunka gee xagga dambe ee taangiga. Sidoo kale keen xagga hore ka dibna dib u gee derbiga.



- Suunka ku adkee tiirarka derbiga ama gobol loox ah adiga oo isticmaalaya dhawr iskuruu oo ah “lag” oo dhererkoodu yahay 1/4-inji x 3-inji ama ka dheer oo leh lingaxyo waaweyn.
- Haddii aad toos ugu qabanaysid shub ama sibidh, isticmaal boolasha fidista (expansion bolts) oo ah 1/4-inji halka aad ka isticmaali lahayd iskuruuyo.

### Il biyo laga helo wakhtiga degdegga

- Biyo si fudud ayaa loo heli karaa marka tuubada beerta lagu xidho barta gororinta, iyo marka la furo tuubo ama qasabad (faucet) ku taala meel ah guriga.
- U hubso in korontada ama gaasta dabiiciga ahi dansan tahay ka hor inta aanad furin barta gororinta.



PO Box 47890  
Olympia, WA 98504-7890

Bogga Internetka:  
[www.doh.wa.gov](http://www.doh.wa.gov)

360-236-4027  
(800) 525-0127

DOH Pub 821-032  
Somali